



Xiriirka joogtada ah ee daryeelka guriga.

Si loo helo daryeel badbaado leh, joogto ah oo isku dubaridan, oo ku haboon rabitaankaaga.

Bixinta xiriir daryeel oo joogto ah

Qofka haysta daryeelka guriga wuxuu xaq u leeyahay waxa loogu yeero xiriirka daryeelka joogtada ah. Waa kalkaaliye tababaran oo mas'uul ka ah inay si sax ah u ogaadaan baahiyahaaga iyo rabitaanadaada, kana shaqeynaaya inay hubiyaan inaa hesho daryeel wanaagsan oo badbaado leh.

Waa xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka kan kuu fulin doona inta badan shaqada daryeelka, si aad marar badan u kulantaan oo aad isku barataan

Tallaabada koowaad – wadhadalka soodhaweynta

Markaad oggolaato xiirka joogtada ah ee daryeelka, xiriiriyahaaga daryeelka ayaa kula soo xiriiraaya oo kula yeelanaaya wadhadalka soo dhaweynta. Waa kulanka ugu horeeya oo aad ka heli karto macluumaad badan iyo fursad aad ku weydiiso su'aalaha aad qabto.

Iskudubaridaha xiriirkaaga daryeelka

Xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka ayaa isku dubaridaaya xiriirka daryeelkaaga oo u gudbinaaya macluumaadkaaga tusaale ahaan shaqaalaha kale ee daryeelka guriga, mas'uulka deeqbixiyaha, shaqaalaha shatiga haysta, xarunta daryeelka caafimaadka iyo adeega safarka. Xiriiriyahaaga daryeelka sidoo kale waa taageeraha qoyskaaga dhinaca daryeelkaaga waa haddii aad bixiso oggolaansho.



Si wadajir ah kuula qorsheynaaya hawlaha lagu qabanaayo

Xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka ayaa si wada jir ah kuula qorsheynaaya sida loo fulinaayo hawlaha wax qabad ee lagu oggolaaday. Taageeradu waxay ku saleysantahay baahidaada intay la egtahay. Si aad u hormariso inaa noqoto qof madax bannaan waxaa lagaa filaayaa inaa sameyso inta awooda ah ee aad sameyn karto.

Haddii aad rabto inaa wax ka qabato goorta hawlaha la sameynaayo, xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka waxa uu isku dayo doonaa inuu kuu helo xalka adiga kuugu fiican. Waa muhiim in adiga iyo xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka aad wada shaqeysaan si aad u heshaan waqtiyo ku haboon adiga iyo shaqaalaha daryeelka shaqada guriga.

Diiwaan gelin iyo sii wadid

Qorshaynta sida dadaalkaaga loo fulinaayo waxaa lagu oraayaa qorshe fulineed. Qorshaha waxaa isticmaalaaya dhamaan shaqaalaha daryeelka.

Xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka wuxuu si joogta ah ula soconaa in heshiisyadaa la raacay, iyo inaa adiga ku qanacsantahay kaalmada aad hesho.

Xiriiriyahaaga joogtada ah ee daryeelka-xiriir muhiim ah

Waa inaa dareentaa badbaado oo aad ku qanacsan tahay qofka ku siinaya daryeelka, taasi waa muhiim. Haddii aad dareento in xiriirka kaala dhexeeya xiriiriyahaaga joogtada ee daryeelka aanu shaqeyneyn, waxaa xaq u leedahay in aad hesho xiriiriye daryeel oo joogto ah. La xiriir mas'uulka qeybta madaxa ka ah waxaa lagaa caawin doonaa in aad beddelato.

**Ahlan, waxaan ahay xiriiriyahaaga
joogtada ah ee daryeelka.**

Magaceygu waa:

.....

Mas'uulka qeybta madaxa ka ah:

.....

**Waxaad nagala soo xiriiri kartaa nambarka
telefoonka:**

.....

**Örebro kommun
Socialförvaltningen**

019-21 10 00
orebro.se



FOTO: CALLE BREDBERG, SUSANNE KRONHOLM, PLATTFORM/SCANDINAV
PRODUKTION: KOMMUNIKATIONSAVDELNINGEN
TRYCKERI: ÄTTA.45



Svanenmärkt trycksak, 3041 0001